KA QAYB-GALKA SIYAASADDA EE JAALIYADAHA SOOMAALIYEED

" Xakamaynta Shareecada iyo Waaqica Lagu Noolyahay"

|Madasha Fikirka |Kulanka 6aad |Maalin Axad ah |Agoosto 1, 2021

ARAR

Sida aan wada ognahay siyaasaddu waa rukun weyn oo ka mid ah rukunnada diinta Islaamka, waxaanna aaminsannahay in ay ka mid tahay baababka fiqiga iyo cilmiga, waliba ay horseed u tahay meelaha ummadaha laga hoggaamiyo oo laga hago, si ay u xaqiijiyaan horumar adduun iyo mid aakhiroba. Sidaas darteed waxaan dareemaynaa in bulshooyinkeenna iyo jaaliyadaheenna soomaaliyeed ay kasoo qaxeen waddamadoodii unasoo qaxeen dhinacaas reer galbeedka sida; Kanada, Maraykanka, Yurub iyo Ustureeliya. Waxayna ku negaadeen waddamo aan kuwoodii ahayn, isla markaasna ay ka noqdeen dad laga tira badan yahay – Aqalliyaad- halkaas oo ay ku barbaareen oo ay ku ballaarteen, ilaa jiilkii koowaad uu maanta jiilkii labaad hoggaanka ku wareejinayo. Haddaba bulshooyinkeennu marka ay dibadaha ku noolyihiin waxay la kulmaan duruufo siyaasdaeed, iyo kuwo bulsho, waxaana soo foodsaara duruufo ka dhaqan duwan qaabkii hore oo ay u noolaayeen, sida bulshooyin saqaafooyin kala

duwan leh. Jaaliyadaha muslimka ahna waxay noqdeen kuwo aan ka go'ikarin marnaba bulshooyinka ay la noolyihiin. Haddaba, mushkiladdu waxay ka imaanaysaa in jaaliyadaha Soomaaliyeed ama muslimka ahi ku dhex noolyihiin bulshooyinkaas iyaga tiro badan ku jooga, mug doorasho oo culusna leh, muddadaan dambena codaynta iyo siyaasadda isbeddel weyn ka muujiyay. Labo cilladood ayaase mar walba hor yimaada jaaliyadaha Soomaaliyeed ama muslimiinta guud ahaan, kuwaas oo ah:

1. **In dhulalka reer galbeedka ay muddadaan danbe kusoo badanayaan loollanka iyo fikradaha isu-bahalagelinta Islaamka [Islamophobia], ama dadka jaaliyadaha nacayb u qaba, taas oo dhalinaysa loollan siyaasadeed oo cunsuriyad ku qotoma, taas oo dadka jaaliyadaha ah xuquuqdooda madaniga ah ee assaasiga ah dhaawacaysa.**
2. **Jaaliyadaha muslimka ah ama kuwa Soomaaliyeed mahaystaan tijaabo ama waayo-aragnimo siyaasadeed oo islaami ah, oo sugan oo ay kaga daydaan habka ay siyaasadda uga qayb-qaadan karaan.**

Haddaba iyada oo laga duulayo arrimahaas oodhan, ayaa **Xarunta Cilmibaarista Bayaan** oo ah xarun bulsheed, oo aan faa'iido doon ahayn, isla markaana abuuraysa deegaan aqooneed togan, kuna qotoma dadka iyo fikradaha, iyada oo loo marayo abuurista baraarug, diyaarinta hoggaamiyayaal, iyo dhisidda bulshada. Xarunteeda dhexena ay ku taal dalka Maraykanka, gaar ahaan Minnesota, waxay soo qaban qaabisay kulanka 6aad ee Madasha Fikirka, iyada oo casuntay qayb kamid ah xiddigaha iyo indheergaradka culimada Soomaaliyeed si ay dooddan uga qayb-qaataan.

Doodda waxaa daadihina isla markaana qaybinayay hadalka Sh. Maxamed Shucayb oo ah Madaxweynaha –**BRC**-. Halka marti dooddu ay ahaayeen:-

1. **Sheekh Cabdiraxmaan Bashiir – Canada –**
2. **Dr. Sh. Maxamuud Shibli – Kenya-**
3. **Sh. Cabdirisaaq Xaashi – USA** –

FAHANKA SIYAASADDA SHARCIGA AH

Bilowga doodda dhammaan culimadu waxay isku raaceen in aysan ahayn markii u horraysay oo muslimiintu ay ka mid noqdaan bulshooyin ay ka tiro yaryihiin, hoggaan iyo maamul ay mutaanna ay qayb ka noqdaan. Dhinaca kale, waxay hoosta ka xarriiqeen in mas'aladani ka hadlkeedu labo arrimood ku taagan tahay:

1. Wixii hore ee soo dhacay ama sidii ay wax u dheceen oo laga yaabo aqoontoodii ama ka warqabkoodii saxnaa in uu yaryahay, iyo

2. Wixii isbeddelay oo waaqaca ah iyo nusuustii iyo wixii hore oo jiray waafajinteeda oo u baahan qiimayn cusub iyo dib-u-akhris iyo isbarbardhig wixii isbeddelay iyo aasaaskii waxyaabihii hore lagu saleeyay in uu waxka duwan yahay iyo inkale.

Dabcan markii axkaamta sharciga ah halla hirgeliyo la yiraahdo xilli iyo goob, markasta waxay u baahataa dib-u-eegista duruufta hadda taagan iyo tilmaamihii sharcigu sheegay ama ijtihaadyadii hore sida ay isu waafaqayaan.

Intaas kadib, waxay isla qireen oo lafa gureen, macnaha siyaasadda, qeexitaannada siyaasadda sharciga ah, heerarkii ay soo martay siyaasadda sharciga ah, iyo tusaalayaal ka turjumaya dhaqangelinteeda, iyaga oo qeexitaanka siyaasadda kusoo ururiyay in ay tahay: ***in dadka la maamulo, loona maamulo wax dantooda xaqiijinaya, wanaagoodana ka talinaya, ka shaqaynaya, ku hagaya. Waxa dhibka, xumaha iyo qallooca ahna ka celinaya***. Halka Siyaasadda Sharciga ah [Siyaasa Sharciyah] marka la raaciyona waxa uun soo kordhaya uu yahay miisaanka wanaagga iyo xumaha, toosnaanta iyo qallooca, dhibta iyo dheefta lagu miisaamayo in uu salka ku hayo laganasoo xiganayo waxyiga iyo sunnada nebiga NNKH. Sidoo kale ***siyaasadda sharciga ah waxay ku qeexeen: dadka in lagu maamulo maamul ka shaqaynaya dadka dantooda adduun iyo aakhiroba, oo wanaagooda ka shaqaynaya, dhibka, xumaha iyo qalloocana ka leexinaya, hadday tahay diintooda, hadday tahay maalkooda, hadday tahay naftooda, hadday tahay dhaqankooda wanaagsan iyo hadday tahay aakhiradoodaba, kaas oo ku salaysan ama ka amba qaadaya aasaas ahaan shareecada Islaamka nusuusteeda, xeerarkeeda, ujeeddooyinkeeda iyo iyada oo laga dhuxul qaadanayo dadaalladii culimada muslimiintu xilliyada, goobaha iyo duruufaha kala duwan ay ijtihaadeen, iyada oo la weheshanayo lagana qaadanayo tusaale***.

SEESKA SIYAASADDA: MASAALIXDA IYO MAFAASIDDA

Kadib, qaybtii koowaad ee nadwada wuxuu hadalku usoo wareegay qaybtii labaad ee doodda oo ahaa aasaaska siyaasadda, iyada oo xoogga la saarayo masaalixda iyo mafaasidda. Culimadu waxa ay hoosta ka xarriiqeen in ay masaalixda iyo mafaasidda lagu saleeyo xeerar ay ka mid yihiin:

- In aad loo barto fiqiga nusuusta (Fighu an-Nusuus)
- Maqaasidda/ ujeedooyinka shareecada oo saddex ah in aan baranno (Fighu al-Maqaasid)
- In waaqaca la weeleeyo (Fighu al-Waaqic)
- In la barto fiqiga isu miisaamidda arrimaha ((Fighu al-Muwaazanaat)
- In la barto sida arrimuhu hortebinta u kala leeyihiin (Fighu al-Awaliyaat)
- In aad loo barto fiqiga isbeddelka (Fighu at-Taqyiir)

Dhanka kale, kolka laga ijtihaadayo arrimaha masaalixda bulshada, waxay u baahan tahay aqoon ballaaran oo shareecada la xiriira, iyo waliba culuumta kale ee aadanaha ku saabsan, sida waxbarashada, caafimaadka iyo siyaasadda. Arrintaasina waxay u baahan dadaal wadareed maadaama meesha aan ka hadlayno ay tahay dad jaaliyado ah oo lagaga tiro badan yahay meesha ay joogaan, isla markaasna ay adag tahay in la helo qof dhammaan culuumtaas aqoon xeel dheer u leh, waxaa lagama maarmaan noqonaysa in la sameeyo gole aqoonyahan oo leh takhasusyo kala duwan si loo gaaro dadaal wadareedkaas.

Dhanka kale, waxa ay culimadu isla garteen, marka la joogo dalalkaan reer galbeedka ee mas'aladuhu isku guntan yihiin, siiba kolka laga hadlayo qaddiyadda siyaasadda in loo baahan yahay:

1. Qof faqiih ah oo ilaahay ku xiran, cilmiga iyo camalkana kulansiiyay, waaqacana wax ka og, diintana aad u yaqaan.
2. Dhinac kasta oo nolosha ka mid ah waxaan uga baahannahay khabiir/ xeeldheere. Kaas oo rumaysan diinta Islaamka, isla markaasna leh anshax iyo dhaqan wanaagsan.
3. Xarumo cilmibaaris, oo si qotadheer u tuujiya maskaxda indheergaradka bulshada.

GUNAANAD

_____

Dooddu waxa ay kusoo idlaatay si qurux badan. Waxaana diiradda lagu saaray gunaanadkiisa caqabadaha iyo fursadaha horyaalla jaaliyadaha soomaaliyeed iyo guud ahaan muslimiinta ku nool dalalka reer galbeedka ee laga tirada badan yahay. Iyada oo si gaar ah xoogga loo saaray dalalka Canada, Kenya iyo USA.

Ugu danbaynna, Sh. Maxamed Shucayb oo ah Madaxweynaha –**BRC**-, kulankana daadihinayay ayaa uga mahadceliyay dhammaan dhegeystayaashii iyo kasoo qayb galayaashii doodda oo ay ugu horreeyeen culimadii qiimaha badnayd ee martida ku ahayd Kulankii 6aad ee Madasha Fikirka ee BRC.

Haddaba doodda oo faahfaahsan oo dhammaystiran lifaaqa hoose ka dhegayso:

https://www.facebook.com/BRC.Center/videos/792003334802189